Xeerarka kala dambeynta ee Shirkadda guryha (guryaha yar yar –iyo guryaha habka safka ah u dhisan)

Xeerarka waxaa loo sameeyey si loo sugo nabadgelyo iyo raaxo ku noolaanshada dadka guriga ku nool. Qof walba waa inay ka fakarto oo tixgeliso dadka kale ee guriga degan ayna qiimeyso hab dhaqankeeda. Dadka guriga degan waa inay sidoo kale ka taxadaraan in martidoodu ay u hogaansanto qawaaniinta iyo xeerarka daarta looga dhaqmo.

Ogeysiiska guuritaanka
Marka guriga loo soo guurayo iyo marka laga guurayo intaba waa in mar walba la ogeysiiyaa xafiiska dad dhigida iyo sidoo kale xafiiska adeega macaamiisha ee shirkada guryaha maamusha.

Goobaha danta guud ama la wada isticmaalo
Albaabada banaanka ee goobaha la wada isticmaalo waxay xiranyihiin saacadaha u dhexeeya 21–07. Markii aad albaabka hore ka soo gashid waa inaad hubisaa in albaabku uu xirmay soo gelitaankaaga kadib. Goobaha dadka guriga degan ka wada dhexeeya waa in lagu maro si aamusnaan ah, sidoo kalena waxaa ka mamnuuc ah in si macno daro ah loo joogo ama sigaar lagu cabo goobahaas. Waa inaan wax lagu goyn marinka lana dhawro nadaafada goobaha dadka guriga degan ka dhexeeya iyo bannaanka gurigaba. Waxaa mamnuuc ah in goobaha dadka guriga degan ka dhexeeya lagu kaydiyo mootooyin ama gaadiid kale oo matoor leh. Sababo la xiriira nabadgelyada dabka awgood alaabooyinka waxaa lagu kaydin karaa oo kaliya goobaha loogu talogalay ama loo cayimay kaydintooda. Sidoo kale waxaa mamnuuc ah in lagu dhejiyo wax boorar ama xayeesiino ah. Guriga waxaa anteeno loogu xiri karaa oo kaliya si waafaqsan hagitaanka xafiiska guryaha ee Espoo uu ka bixiyey habka xiritaanka anteenooyinka.

Qolalka dharka lagu dhaqo
Qolka dhar dhaqidu wuxuu leeyahay xeer u gaar ah hadba shirkada guriga maamusha. Dhar dhaqida dabadeed waa in qolka oo nadiif ah laga tago lagana taxadaro in korontada laga jaro mashiinada. Mashiinka dhar dhaqida laguma dhaqi karo wax roogag ah. Dharkaaga waa inaad ka aruursato qolka qalajinka hadiiba marka dharku uu qalalo. Mashiinka dharka qalajiya qaanadiisa hoose waa in isticmaalka kadib mar walba laga nadiifiyo tunta ama dufta uu dharku ku reebay.

Maareynta qashinka
Qashinada caadiga ah iyo qashimada kale waxaa ayadoo la baceeyey lagu ridaa weelasha qashinka ayadoo la raacayo hagitaanada qoran ee laga bixiyey kala saarida qashinka, Qashimada aan ahayn kuwa caadiga ah (sida qalabka guriga) fogeyntooda waxaa xil ka saaranyahay oo iska leh dadka guriga degan mana aha in lagu rido weelasha qashinka loogu talo galay. Haraaga khatarta ah sida tusaale ahaan kaarikada telefoonada, bateriga, weelasha rinjiga wax la mariyo uu kadhamaaday iyo daawooyinka waa in lageeyo goobaha dib u isticmaalidda ay HSY u cayintay (kierrätyspiste).

Baarkimada gawaarida
Gawaarida waxaa loo ogolyahay oo la dhigi karaa boosaska iyaga loo qabtay oo loo calaamadeeyey oo kaliya. Baarkinka qofka guriga degan waxaa loo ogolyahay meesha asaga loo qabtay oo kaliya sidoo kale martida waxaa loo ogolyahay boosaska martida oo kaliya. Boosaska martida waxaa

loogu talogalay in martidu gawaarida dhigato waqti gaaban oo kaliya. Baarkimada guriga waxaa loogu talogalay oo kaliya gawaarida yar yar iyo mootooyinka shaqaynaya ee aan ciladda lahayn. Gawaarida iska istaaran waa mamnuuc. Uga tegitaanka gawaarida ciladaysan ama qaybo ka mid ah goobta baarkinka waxaa qofka iska leh uga imaanaya ganaax lacageed oo la xiriirta qarashka lagu qaaday iyo waxyeelda ka soo gaartay bay'adda. Fiilada qaariga lagu kululeeyo waa in isticmaalka ka dib mar walba korontada laga saaro isla markaasna la xiro santuuqa korontada. Gaariga oo marwalba si khaldan loo baarkingareeyo wuxuu sababi karaa heshiiska kirada oo la burriyo ama la kansalo (KKO:1997:85).

Qolalka
Waa mamnuuc dhamman wixii hab dhaqan deriska dhibaya ah. Saacadaha u dhexeeya 22-07 waa in deriska la siiyo nabgelyo iyo daganaansho habeen. Guriga aad degantahay waa in si fiican loo dhawro. Waxyeelooyinka biyaha ee ay tubooyinka jaban sababaan ama ciladaha lagu arko goobaha la wada isticmaalo waa in si aan daahid lahayn loo ogeysiiyo shirkada guriga daryeesha. WC-ga ama musqulaha iyo qasabadaha kale ee wasaqda qaada laguma ridi karo wax qashin ah oo xiri kara ama waxyeelo u geysan kara qasabadaha bulaacada.

Bannanka guriga
Waxaa dadka guriga degan waajib ku ah nadaafada bannaanka uu gurigu leeyahay iyo sidoo kale ka shaqaynta jardiinada iyo hawlaha baraf xaarida. (fiiri shuruudaha heshiiska kirada) Waxaa mamnuuc ah quudinta xayawaanaadka duurka ku nool. Ayadoon wax ruqsad laga haysan shirkaada guriga iska leh, waxaa mamnuun ah in guriga banaankiisa laga sameeyo hadh ah ama laga dhiso guriga ay caruuruhu ku ciyaaraan iyo wixii la mid ah. Guriga banaankiisa waxaa loo ogolyahay in dharka lagu qoraxeeyo laguna qalajiyo dharka yar yar. Jafida roogaga iyo gogosha sariirta waxaa loo ogolyahya oo keliya in lagu jafo meelaha loogu talogay ama loo qabtay jafitaankooda..

Balakoonada
Waa mamnuuc in balakoonka guriga lagu jafo wax roogag ama gogosha sariiraha ah. Jafida roogaga iyo gogosha sariirta waxaa loo ogolyahay oo keliya in lagu jafo meelaha loogu talo-gay ama loo qabtay jafitaankooda. Balakoonka guriga waxaa loo ogolyahay in dharka lagu qoraxeeyo laguna qalajiyo ayadoo la isticmaalayo xariga balakoonka hoostiisa ku xiran. Waa mamnuuc in balakoonka lagu dhaqo biyo gul qulaya ama dareeraya.

Balakoonka waxaa si adag uga mamnuuc ah in wax lagu dubo ama cunto lagu kariyo. Waa mamnuuc in balakoonka ama banaanka daarta shirkada guriga lagu quudiyo wax xayawaanaad duur joog ah.

Xayawaanaadka gurijoogta ah
Qololka bannaankooda marka la joogo xayawaanaadka gurijoogta ah waa in mar walba xarig lagu hayo si aysan u dhibin dadka kale ee daarta wax ka degan. Waxaa si adag mamnuuc u ah in xayawaanaadka gurijoogta ah loo bannaan bixiyo ama lagu hayo daarta barxadeeda ama sheedeeda, Saxarada xaywaanaadka gurijoogta ah waa in lagu aruuriyo weelasha qashinka.

Sigaar ku cabida guriga dhexdiisa iyo daarta oo dhan

Dhammaan qololka
Qolalka sigaar laguma cabi karo hadii heshiiska kirada lagu mamnuucay. Kharashka dayactirka ee sigaarku sababay ma ahan mid qabow caadiya ah ka yimid. Kharashka dayactirka ee ay dhibaatada sigaarku guriga u keento waxaa biilkeeda magdhawga lagu soo dalacayaa qofka guriga degan oo sababay dhibaatada.

Kadib marka heshiiska kirada ee dhamaan guryaha daartu ka koobantahay lagu daro mamnuucida sigaar cabida, ayaa waxaa dhaqan galeysa in mamnuucida sigaar cabku ay sidoo kale saameyso balakoonada iyo goobaha kale ee daarta dhexdeeda ah. Arintaan waxaa la iclaamin doonaa markii uu xeerku si rasmi ah u dhaqan galo.

01/2010 kadib guryaha dib loo dayactiray
Waxaa ka mamnuuc ah in sigaar lagu cabo guriga dhexdiisa, balakoonka iyo sidoo kale daarta oo dhan dhexdeeda. Kharashka dayactirka ee ay dhibaatada sigaarku guriga u keento waxaa biilkeeda magdhawga oo kaamil ah lagu soo dalacayaa qofka guriga degan oo sababay dhibaatada.

01/2010 kadib guryaha la dhisay
Waxaa ka mamnuuc ah in sigaar lagu cabo guriga dhexdiisa ama balakoonka iyo sidoo kale daarta oo dhan marka laga reebo meelaha ay suurtogalka tahay in loogu talogalay cabitaanka sigaarka. Kharashka dayactirka ee ay dhibaatada sigaarku guriga u keento waxaa biilkeeda magdhawga oo kaamil ah lagu soo dalacayaa qofka guriga degan oo sababay dhibaatada.

Jabinta xeerarka
Xeerarka guriga u yaal oo si joogto ah loo jabiyo waxay keeni karaan ama lagu mutaysan karaa ganaax ama magdhaw lacageed iyo/ama heshiiska kirada guriga oo la burriyo ama la kansalo.

Xeerarkaan kala dambeynta guriga waxaa lagu turjumi doonaa 12 luuqadood oo kala duwan. Fiiri bogga internetka ee www.espoonasunnot.fi ama dalbo nuqulkooda.